

Tusaalooyinka Dukumintiyada la Aqbalo

Sawirka kaaraka Aqoonsiga ay dawladdu bixiso – Mid kamid ah kuwa soo socda ayaa la bixin karaa:

- Shatiga daraawalka
- Kaar aqoonsi uu Gobolka bixiyo
- Baasaboor
- Sawir kaar Aqoonsi ee SNAP/EBT ah
- card Sawir kaar Aqoonsi ee Militariga Mareykanka

Caddeyn Lambarka Amniga Bulsho (Waa inuu ku jiraa dhammaan 9 xuruuf) – Mid kamid ah kuwa soo socda ayaa la bixin karaa:

- Kaarka Amniga Bulsho ee laga soo qaato Maamulka Amniga Bulsho (SSA)
- Foomka Canshuurta SSA-1099
- Foom canshuur 1099 ah
- Kaarka Medicare haddii ay u dambeeyso "A" (aan ahayn MaineCare)
- Dukuminti Militariga Mareykanka
- Foom Canshuur Bangi
- W-2 (bayaan canshuur iyo mushaar) – Qasab ma ahan inuu ahaado mid haddeertan ah

Muwaadin ahayn – Dukumintiyada la aqbali karo ee Aan Dhicin

- Kaarka Amniga Bulsho ee ay bixiso Maamulka Amniga Bulsho. Haddii kaarka Amniga Bulsho ay ku jirto mid kamid ah hayndaabyadaa hoos lagu xusey, codsaduhu waa inuu bixiyaa taariikhda dhicitaanka oggolaanshahooda shaqo.
 - Ansax u ahayn inuu shaqeeyo.
 - Ansax u ah kaliya inuu la shaqeeyo oggolaanshaha INS.
 - Ansax u ah kaliya inuu la shaqeeyo oggolaanshaha DHS.
- Baasaboor ajanibi oo aan dhicin oo ku dhegan fiiso Mareykan sax ah oo aanu dhicin ay wehilso foomka I-94 la ansixiyey oo sharaxaya soo galitaankii ugu dambeeyey ee codsadaha ee Mareykanka. Foomka canshuur 1099 ah.
- Kaarka Degenaanshaha Joogtada ah (I-551)
- Foomka I-94 ee Imaansaha Tagidda ee leh sh shaabad "I-551 Ku-meel-gaar ah" iyo ku dhegan sawirka haystaha.
- I-94 oo shaabadeysan oo leh mid kamid ah xaaladaha soo socda: La sii daayey ama Sii deyn, Qaxooti, Magan-galyo, HP – Lagu sii daayey Aadane, PIP – Lagu sii daayey dano dadweyne, ama Soo gale Cuban-Haiti ah
- Rukhsad Dib-usoo-gelid degenaansho Joogto ah (I-327)
- Dukuminti Socodaal ee la siiyo Dadka sida Joogtada ah u Degan (I327)
- Dukuminti Socodaal ee la siiyo Qaxootiga Foomka (I-571)
- Foomka Muwaadinimada Mareykanka iyo Adeegyada Socodaalka I-797C- Ogeysiis Tallaabo.